# Tallaalka BCG iyo ilmahaaga

## In dhallaanka laga ilaaliyo cudurka qaaxada



**Tallaalku waa difaaca ugu fiican ee ilmahaaga**

**Buug-yerahan wuxuu ku saabsan yahay tallaalka BCG (Bacillus Calmette-Guerin) ee la bixiyo si ilmahaaga looga ilaaliyo cudurka qaaxada (TB).**

# Waa maxay tallaalka BCG?

Tallaalka BCG wuxuu ka kooban yahay qaab la daciifiey oo ah bakteeriyada (jeermiska) sababta cudurka qaaxada. Maadaama la daciifiyey, ma sababo cudurka qaaxada, laakiin wuxuu ilmahaaga ka caawinayaa in jirkiisa uu yeesho difaaca (ka hortagga) cudurka haddii ay dhacdo inuu la kulmo cudurka.

# Waa maxay cudurka qaaxada?

Qaaxadu waa cudur faafa oo halis ah oo sababi kara TB meningitis (oo ah barara xuubka maskaxda) ee dhallaanka. Dadka da'da yar iyo dadka waaweyn wuxuu cudurka badanaa saamayn ka gaarsiiyaa sambabada, laakiin wuxuu sidoo kale saameyn ku yeelan karaa qanjirada, maskaxda ama lafaha. Daaweynta cudurka qaaxada waxay qaadataa dhowr bilood. In kastoo inta badan dadka ku nool dalkan ay si buuxda u bogsadaan daawaynta kadib, cudurka TB meningitis wuxuu noqon karaa mid dilaa ah ama wuxuu sababi karaa naafonimo aad u daran.

# Sidee lagu qaadaa cudurka qaaxada?

Waxaad kaliya cudurka tiibayda/qaaxada ka qaadi kartaa qof sambabadiisa ama cunahiisa uu hore u saameeyey cudurka oo qufacaya. Marka ay qufacaan, dhibco yaryar ayaa afkooda ka soo baxa, dhibcahaas oo ay ku jiraan jeermiska. Haddii aad gudaha u neefsato dhibcahaas jeermiska wata, waxaad sidoo kale qaadi kartaa



Waxa jira ku dhawaad 5,000 oo kiis oo Qaaxo ah gudaha UK sanadkiiba iyadoo ku dhawaad 60 ka mid ah kiisaskaas laga helo Waqooyiga Ireland. Sidaas darteed, iyadoo aanay u badnayn in aad qaado cudurka, qof kastaa waa inuu ka warhayaa astaamaha cudurka qaaxada. Tani waxay muhiim u tahay si gaar ah sababtoo ah cudurka qaaxada waa cudur ku baahsan adduunka oo dhan, wuxuuna ku baahayaa meelo badan. Iyadoo dad aad u tiro badan ay ku safrayaan adduunka oo dhan, khatartu way sii kordheysaa marka dadka ku noolaa ama ka soo shaqeeyey waddamada uu cudurka ku badan yahay ay la kulmaan cudurka ama ay keenaan dalkan.

## Waa maxay astaamaha cudurka qaaxada?

Qaaxadu waxay saamayn kartaa qayb kasta oo jirka ka mid ah, sidaas darteed astaamuhu way kala duwan yihiin, calamadaha cudurka ee soo muuqda ilmo yar ayaa laga yaabaa inay ka duwan yihiin calaamadaha ka soo muuqda dadka qaangaarka ah. Si kastaba ha ahaatee, maadaama qaaxadu ay tahay mid la kala qaado, waxaa muhiim ah inaad garan karto cudurka markaad ku aragto qof kale. Waa inaad la xiriirtaa
dhakhtar haddii ilmahaaga, ama xubin kale oo qoyskaaga ka mid ah, ama saaxiibkaa uu qabo mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- qufac soconaya in ka badan saddex toddobaad
- qandho;
- dhidid, gaar ahaan habeenkii
- culayska jirka oo is dhima
- daal dareemis
- qufac dhiig leh

Wadamada leh heerarka ugu sareeya ee cudurka qaaxada waxaa laga heli karaa: **www.gov.uk/government/publications/tuberculosis-tb-bycountry-rates-per- 100000-people**

## Waa maxay sababta ilmahayga loogu tallaalayo tallaalka BCG?

Gudaha Boqortooyada Midowday (UK), si la mid ah wadamo kale oo badan, tallaalka BCG waxaa la siiyaa dhallaanka oo marka loo barbardhigo dadweynaha kale, u badan inay la kulmaan qof qaba cudurka qaaxada. Sababtoo ah waxay ku nool yihiin meel ay ku badan tahay qaaxada ama waalidkood ama waalidiinta waalidkood ayaa ka soo jeeda waddan ay ku badan tahay qaaxada; Tallaalku waa lacag la'aan waxaana badanaa la bixiyaa dhalmada kadib ha ahaato isbitaalka ama markaad guriga ku laabato.

## Sidee ilmahayga loo tallaalaa?

Ilmahaaga waxa tallaalka BCG laga siin doonaa qaybta sare ee cududa bidix.

## Ma jiraan waxyeellooyin gaar ah oo lagala kulmo tallaalka?

Isla markiiba kadib marka lagu duro tallaalka, finan ayaa ka soo baxaya goobta la durey. Tani waxay ku tusinaysaa in duritaanka loo sameeyey si fiican.

Laba ilaa lix toddobaad gudahood laga bilaabo xilliga duritaanka, bar yar ayaa soo bixi doonta. Bartaan ayaa waxaa laga yaabaa inay boog ahaato dhowr maalmood, laakiin si tartiib ayay u bogsan doontaa haddii aadan daboolin. Waxaa laga yaabaa inay noqoto bar yar.

Marar dhif ah, ayaa waxaa laga yaabaa in ilmahaaga uu yeesho nabar gacmeed uga soo baxa meesha laga durey. Haddii uu nabarkani leeyahay dareere ka soo baxaya oo uu u baahan in la daboolo, isticmaal dhaymo/maro engegan – waligaa ha saarin balaastar – ilaa qolof ka soo fuulo nabarka. Nabarkani wuxuu qaadan karaa ilaa dhowr bilood si uu u bogsado.

Haddii aad ka walwalsan tahay ama aad u malaynayso in nabarku caabuq qaaday, u tag dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada.

Marar dhif ah, tallaalku wuxuu sababi karaa fal-celin xasaasiyadeed, sida finan ama cuncun saamayn ku yeesha qaar ka mid ah ama jirka oo dhan. Xitaa si aad dhif u ah, carruurtu waxay falcelin aad u daran ku yeelan karaan
tallaalka, taas oo u keeni karta neefsashada oo ku adkaata iyo suuxdin. Falcelintaas xasaasiyadeed waxa loo yaqaan 'anaphylaxis'. Daraasad dhowaan la sameeyay ayaa muujisay in hal kiis oo 'anaphylaxis' ah laga soo sheego nuskii milyan ee tallaal la bixiyaba. Inkasta oo falcelinta xasaasiyaddu ay noqon karto mid walaac leh, daawadu waxay keentaa soo kabasho degdeg ah oo buuxda.

## Ma jiraan sababo ka reebaya ilmahayga inuu qaato tallaalka BCG?

Waa inaan tallaalka lagu durin ama tallaal siinta waa in dib loo dhigo haddii ilmahaagu:

- qabo qandho sareysa;
- laga daweynayo kansarka ama xaalad kale oo caafimaad oo halis ah oo

daciifisa habdhiska difaaca jirka
- laga yaabo inuu qabo HIV (tusaale ahaan haddii hooyadu qabto HIV)
- uu qabo xaalad caafimaad oo maqaarka ah, tusaale ahaan cambaar
- Uu guri kula noolaan doonaa qof laga shakisan yahay ama qaba cudurka qaaxada oo aan weli la daweyn. Xaaladdaas oo kale, qaadashada tallaalka BCG waxaa loo baahan karaa in dib loo dhigo - arrintaas ayaa lagaala hadli doonaa.

## Ma jiraan wax kale oo aan u baahanahay inaan ogaado?

Ilmahaagu waxa uu bilaabi karaa qaadashada talaalka aasaasiga ah ee caadiga ah marka uu jiro laba bilood iyada oo aan loo eegin marka ay qaataan tallaalka BCG.

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad xaqiijisaa in ilmahaaga aan cirbad kale loogu durin isla cududda/addinka laga siiyey tallaalka BCG ugu yaraan saddex bilood kadib, haddii kale qanjirada ku jira goobtaas ayaa laga yaabaa inay bararaan.

Sidoo kale xaqiijin inaad haysato diiwaanka tallaalka BCG oo uu kuugu jiro Diiwaanka Caafimaadka Ilmaha ee Gaarka ah (PCHR) si loo tixraaco mustaqbalka.

## Sideen ku ogaan karaa in ilmahaygu u baahan yahay tallaalka BCG?

Haddii aad 'Haa' kaga jawaabto mid ka mid ah su'aalahan, ilmahaagu waa inuu qaataa tallaalka BCG haddii isaga ama iyada aanu hore u qaadan mid.

- Mid ka mid ah waalidka ilmahaaga ama mid ka mid ah awoowayaasha/ayeeyayaasha ilmahaaga ka soo jeedaa waddan uu ku badan yahay cudurka qaaxada (sida ku qoran **www.gov.uk/government/publications/tuberculosis- tb-by-country-rates-per-100000-people/who-estimates-of-tuberculosis-incidence- by-country-and-territory-2020-accessible-text-version** )?
- Adiga iyo ilmahaaga miyaad aadi doontaan oo aad ku soo noolaan doontaan wax ka badan hal bil ama miyaad si joogto ah ugu safri doontaan mid ka mid ah wadamadan mustaqbalka dhow?
- Ma jiraa qof gurigaaga jooga, ama qof kale oo ay u badan tahay in uu xiriir dhow la yeesho ilmahaaga, kaas oo qaba cudurka qaaxada, ama qabay cudurka qaaxada shantii sano ee la soo dhaafay ama ka soo jeeda mid ka mid ah wadamadan?

## Miyaan codsan karaa tallaalka BCG naftayda ama carruurtayda?



Keliya shakhsiyaadka khatar gaar ah ugu jira cudurka qaaxada (kor ka eeg) ayaa la siinayaa tallaalka BCG. Adiga ama ilmahaaga waa la idin qiimayn doonaa si loo eego inaad
buuxiseen shuruudaha kahor inta aan la idin siin tallaalka.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cudurka qaaxada, ama tallaalka BCG ama tallaalo kale, ama haddii aad u baahan tahay buug-yarahaan oo ku qoran luqado kale, la hadal dhakhtarkaaga, booqdaha caafimaadka, umulisadaada ama kalkaalisada, ama booqo **www.nidirect.gov.uk/conditions/tuberculosis-tb#toc-4**

**Xasuusnoow, daawaynta cudurka qaaxada waxay qaadataa waqti dheer, ka-hortagga ayaa ka fudud.**

Public Health Agency

**Public Health Agency**
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net

Naga raadi

08/23